

Cunugaagu ma waxa noqonaya

5 jir → **AGOOSTO** 31 ?



Haddii ay sidaas tahay, **hada waa waqtigii and ka** diiwaangelin lahayd kindergartenka!

Hel caawinaada

isdiiwaangelinta. Soo booqo xafiiska iskuulka ama degmada deriskaaga.

Diiwaangelinta Kindergartenka Waxay Bilaabanaysa Janaayo 19, 2016: Maxay muhiim u tahay?

Qodobadada Hadalka La Soojeediyey

Faa'iidada Isdiiwaangelinta Hore

Faa'iidooyinka Qoysaska

Haddii qoys/daryeele uu horay isku diiwaangeliyo, waxaa laga yaaba in:

- Lagu casuumo xaflada kindergartenka iskuulka, halkaasoo ay kula kulmi karaan waalidiinta kale, macalimiinta iyo ku booqan karaan iskuulka.
- Turjibaan ayaa jooga inta ay soocoto hawsha isdiiwaangelinta.
- Wax kale ka ogoow illaha klinigyada talaalka, goobaha cuntada xagaaga iyo dheeraad.
- Helaan waqti iyo caawinaad uu siiyo iskuulka isku qorida cuntada, gaadiidka baska, iyo barnaamijka iskuulka kadib.

Faa'iidooyinka Carruurta

Haddii cunuga la diiwaangeliyo Juune kahor:

- Waxaa laga yaaba inay helaan fursado ay uga qeybgalaan barnaamijka ku wareejinta kindergartenka.
- Fasaladu waxay diyaar u ahaan doonaan carruurta—waxay heli doonaan miiskooda, qalabkooduna diyaar ayuu u ahaan doonaa, oo waxay dareemi doonaan soo dhaweyn iyo inay qeyb ka yihiin fasalka.
- Macalinkuna waxa uu diyaar u ahaan dona cunuga; waxay ku salaami doonaan magacooda, ku soo dhaweyn doonaan fasalka, iyo sannadka meel fiican ka bilaabi doonaan!

Faa'iidooyinka Iskuulka

Markii qoysasku is diiwaangeliyaan waqtigooda:

- Iskuulku waxa uu og yahay tirada carruurta iyo qoysaska ay tahay inay isku diyaariyaan, inta macalin ay tahay inay qortaan, iyo fasalada ay isticmaali doonaan.
- Macalimiinta iyo shaqaalaha iskuulku waxay la kulmi karaan carruurta iyo qoysaska sannadka biloowgiisa kahor.
- Iskuulku waxa uu ka caawin kara qoysasku sidii ay ku soo buuxin lahaayeen baahidooda iyo ugu diyaarin lahayeen caruurtood aynay guuleeystaan.

Dhibaatooyinka Isdiiwaangelin La'aanta

Dhibaatooyinka Qoysaska

Markii qoysaska/daryeelayaashu sugaan inay is diiwaangeliyaan, waxaa laga yaaba inay:

- Aanay helin caawinaada shaqsiyeed ee ay uga baahan yihiin macalinka, kalkaaliyaha iskuulka amamaamulaha si ay u ogaadaan iskuulka iyo ula wadaagaan macluumaadka caruurtooda.
- Sugaan hawsha codsiga qadada bilaashka/ama raqiiska ah.
- Waa inay keenaan caruurtooda iskuulka marka uu iskuulku biloowdo inta jadowalkooda gaadiidka laga diyaarinayo.

Dhibaatooyinka Carruurta

Haddii aan cunuga la diiwaangelin xilli hore:

- Waxaa laga yaaba inay ka maqnaadaan maalmaha muhiimka ah ee ugu horeeya.
- Fasalka waxaa laga yaaba inuu buuxo sitimaanada ugu horeya inta macalimiin kale laga helayo.
- Waxaa laga yaaba inay cuntada waayaan ama raacintaanka baska siitimaanada hore ee iskuulka inta waraaqahooda laga diyaarinayo
- Waxaa laga yaaba inay ka maqnaadaan qaar ka mid ah dhisitaanka bulshada ee muhiimka/is barashada/howlaha saaxiibtinimada.

Dhibaatooyinka Iskuulka

Markii aanay qoysasku is diiwaangelin xilli hore:

- Iskuulku horay uma qorsheeysan karo tirada macalimiinta, diyaarinta fasalada, iyo gaadiidka loo baahan yahay.
- Shaqaalaha iskuulku wey ku wareeraan iyo ku badataan markii ay tahay inay xilli danbe diyaariyaan diiwaangelinta.
- Shaqaalaha iskuulku lama ay kulmin qoysaska si ay u ogaadaan sida ugu fiican ee loo siin karo caawinaada.

www.KRegNow.org